



## EERNADA (Hernia)

Mohamed Ibrahim, MD

### Maxay tahay:

Eernada ma aha cudur balse waa daciifnimo ku timid murqaha iyo seedadka jirka kuwaas oo jirkeena waxa gudaha ugu jira noo celiya. Waa jirka darbigiisii oo debecsamay. Inta badan dadku waxay yaqaanaan eernada ku dhacda qaska (**groin hernia**) oo dadka qaarkood u yaqaanaan **sheelo**. Eernada ku dhacda qaska waa mida ugu badan. Halkana waxaan kaga hadlaynaa eernada qaska. Sawiradan hoose tixraac.



M. Ibrahim, MD

## **Astaamaha:**

Astaamaha eernada qaska waxaa ka mid ah adigoo isku arka in meeshii dabacday ay ka soo muuqato wax buuran ama kuusan (bulge). Inta badan waxaa lasocda xanuun markay soo riixanto sii kordha. Eernada waxay soo baxdaa marka uu kordho bareesharka gudaha jirka sida marka uu culays qaado qofka ama xoog u qunfaco. Kullamaa uu waqtiga sii kordho eernada way sii weynaataa. Wadamada gaajaysan ee aan heli karin qaliin waxaa la arki karaa iyadoo ay eernada qayrul caadi usoo waynaatay.

## **Maxaa keena:**

Saan horeyba ugu hadlay, eernada waxay ka timaadaa iyadoo ay jilicsanaadeen darbiga jirka ee mindhicirka gudaha ku haya. Eernada qaska ku dhacda ee dad badani u yaqaanaan sheelada waxay timaadaa markii uu murqaha iyo seedaha ku jira derbiga qaska ay jilicsanaadaan kadibna mindhicirka iyo waxa uu darbigaa celinayey ay doloolkaa ka soo baxaan sida aad ku aragtaan sawirka kor ku qoran.

## **Daaweynteeda:**

Qaliin uunbaa lagu daaweeyaa eernada. Inkastoo uu qofku iska sugi karo ilaa iyo isbedel kale ku dhacayo, balse waxaa intabadan lagu waaniyaa in uu qofku iska qalo. Qaliinka eernada qaska waa mid aad u fudud oo isla maalinta lagu qalo gurigaada aad u laabanayso. Waayadii hore waxaa la sameyn jiray in daloolka ama meesha jilicday la talo balse dib ayay ugu soo noqon jirtay in badan. Sidaa awgeed ayaa casrigan cusub waxaa lagu haggaa jiyaa iyadoo shabaqad lagu talo si ay u adkayso.



## **OGAYSIIS (DISCLAIMER):**

Casharkaas iyo warbaahintaas kor ku xusun looguma talagelin in lagu sheybaaro ama daweyo shaqsi. Fadlan la xiriir dhaqtarkaada hadii ay astaamo ku hayaan.